

# **Waa in degmooyinku isu diyaariyaan inay irbad saddexaad oo tallaalka ah siiyaan dhammaan dadka ka weyn 45 sano**

Dawladdu waxay degmooyinka ka codsanayaa inay irbad xoojin ah u fidiyaan dhammaan dadka 45 sano ka weyn, ka dib marka loo fidiyo dhammaan dadka 65 sano ka weyn. Islamarkaana waxa dadka ka weyn 18 sano ee qaba cudurro kale oo waaweyn iyo dhammaan dadka ka shaqeeya caafimaadka iyo daryeelka waxa loo fidinayaar irbad tallaal oo xoojin ah.

Dawladdu waxa ay 12-kii Nofember go'aamisay in irbad saddexaad oo tallaalka ah loo fidiyo dadka 18 sano ka weyn. Machadka Caafimaadka Dadweynaha ayaa hadda sameeyay qiimayn ku saabsan qaabka arrintan loo fulin karo, dawladduna waxay raacaysaa soo jeedintooda. Waxa weli la qorshaynayaa in islamarkaana dadka u dhixeeleya 18 iyo 45 sano la siiyo irbad xoojin ah.

– Waa muhiim in degmooyinku ay si buuxda u wadaan hawsha tallaallista. Waxa ugu muhiimsan in irbadda saddexaad la siiyo dadka ka weyn 65 sano, ka dibna waa in ay ku xigsiiyaan dadka 45 sano ka weyn. Waxa aan rabaa in aan degmooyinka siiyo qorshe ay ku tashan karaan si tallaallista irbadda saddexaad u sii socoto, oo degmooyinku aanay u yaraynin awoodda tallaallista, ayuu yidhi raysalwasaare Jonas Gahr Støre.

Inta badan dadka 65 sano ka weyn ee si buuxda u tallaallani waxay si wacan uga difaakan yihiin in ay si weyn u bukoodaan, xataa marka lix bilood ka soo wareegtay markii ay qaateen irbaddii labaad. Laakiin faafidda cudurka oo badata ayaa kor u qaadi karta dadka cudurka qaadaya kuna bukoonaya.

– Wuxa kordhaya heerka faafidda cudurka, taas oo keenaysa in dad intii hor ka badan ay ku xanuunsadaan cudurka. Irbad xoojin ah oo ah tallaalka koroonaha ayaa qof kastaa ka helayaa difaac intii hore ka wacan, waxaanay joojin kartaa faafidda cudurka iyo in cadaadis ku yimaado adeegyada caafimaadka, ayay tidhi Ingvild Kjerkol oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Irbadda xoojinta ah waxa qofka loo fidinaya 6 bilood ka dib irbaddii 2-aad. Wuxa habboon in degmooyinku mudnaanta siiyaan dadka inta ugu badan sugayey. Sidaasi waxay keenaysaa in dadka ugu baahida weyn la hor mariyo.

### **Irbadda saddexaad oo la siinayo dhammaan shaqaalaha adeegyada caafimaadka iyo daryeelka**

Dhammaan shaqaalaha adeegyada caafimaadka iyo daryeelka waxa loo fidinaya irbad xoojin ah, oo looma fidinayo keliya kuwa si toos ah u caawiya bukaanka.

– Sidan waxannu u yeelaynaa si loo ilaaliyo shaqaalaha ka shaqeeya adeegyada caafimaadka iyo daryeelka iyo si looga hortago faafidda cudurka loona difaaco bukaanka, ayay tidhi Kjerkol.